



## Natijoooyinka dugsiga ee Successful Schools Survey (Sahanka Guusha Dugsiyada) ayaa hadda la heli karaa

Xogta heerka dugsiga ee Successful Schools Survey (Sahanka Guusha Dugsiyada) ayaa hadda la heli karaa. Sahanka, oo la sameeyay intii lagu jiray sannad dugsiyeedka 2018-19, waa qayb ka mid ah dadaallada degmadu ay u adeegsaneyso xogta si ay u gaarto go'aanno wargelin ah oo ku saabsan jawiga dugsiga iyo dhaqanka.

Natijoooyinka dugsi kasta waxaa laga heli karaa [websaydhka wada-hawlgalayaasheena, Panorama Education](#). Guuji calaamada “dugsiyada” si aad dugsigaaga uga hesho tasmada xulashada.

Sahanku waxaa ka jawaabay 14,119 qoys, 9,442 arday oo fasalada 5, 7 iyo 10 ah, iyo 3,156 xubnood oo shaqaale ah. Natijoooyinka waxaa isticmaali doona dugsiyada si looga caawiyo inay fahmaan baahiyaha ardaydooda iyo qoysaskooda iyagoo ka shaqeeynaya horumarinta qorshooyinka dugsiga. Heerka degmo, waxaan u adeegsan doonaa macluumaadkan sidii aan u qaabayn lahayn qorsheheena istiraatiijiyadeed.

Sahanka 2018-19 waxaa loo adeegsan doonaa gundhig lagu sameeyo isbarbardhiga mustaqbalka laguna cabiri doono horumarka. Waxaan samayn doonaa sahanka noocan ah sannad kasta, iyo Sahammada Dugsiyada Guusha ee 2019-20 waxay bilaabmi doonaan dhammaadka Jannaayo.

Macluumaad dheeri ah oo ku saabsan Sahanka Guusha Dugsiyada ee 2018-19, ka eeg [bogga barnaamijka](#).